Ohio | Waaxda Caafimaadka

**Mike DeWine**, Badhasaab
**Jon Husted,** Lt .Badhasaab

**Lance D. Himes,** AgaasimeKumeelGaadhah

## AMARKA AGAASIMAHA

**Tixraac:** **Amarka'Agaasimah ee loogu talo geley Tukaamada iyo Ganacsiyada U Hogaansanka Daboolka Wajiga ee uu Gobolka Ohio oo dhan**

Aniga oo ah, Lance D. Himes, Agaasimaha Kumeel Gaadhka ah ee Waaxda Caafimaadka Ohio (Ohio Department of Health, (ODH), oo raacaya awooda la igu siiyay R.C. 3701.13 ee "inaan soosaaro amaro gaar ah... si looga horatago faafitaanka xanuunka ama caabuqa," **Waxaan amrayaa** waxa soo socda si loo baajiyo faafitaanka COVID-19 ee Gobolka Ohio:

**Hordhac:** Maadaama oo uu kordhay faafitaanka COVID-19 Ohio, jawaab xooggan ayaa loo baahan yahay hadii Ohio ay yaraynayso in bandoo wayn lasoo rogo oo la xadido sida kuwa lagu soo rogay dalalka kale iyo magaalooyin iyo gobolo kale oo Maraykanka ku yaala. Degmo kasta oo Ohio ah waxay ku jirtaa degmooyinka "dhacdooyinka badan ", taas oo muujinaysa in Gobolka Ohio uu safmar isku mid ah oo balaadhan ka jiro oo uu COVID faafayo-19. Qof kasta oo reer Ohio ah waxa uu xaq u leeyahay inuu ogaado in tukaamada iyo ganacsiyada ay galayaan ay yihiin amaan ilaa inta macquulka ah oo gobolku uu qaadayo talaabooyinka loo baahan yahay ee shaqada dhaqaalaha Ohio ay ku soconayso. Markaa ficil dhakhso ah ayaa loo baahan yahay.

1. **Shuruudaha u Hogaansanka :** Si loo yareeyo faafitaanka dhakhsaha ah ee COVID-19 ee Ohio, waxa aan halkan ku Amrayaa in tukaana ,tukaan tafaatiiqeed ama shirkad kale oo ku taala Ohio oo haysa alaabaad dadku qadaanayaan, marka laga tago kuwa lagu sheegey Amarada baaragaraafka 14, (si wada jir ah,"Tafaariiqlayaal") inayna furnaan ama ayna shaqayn iyada oo u hogaansamaysa Amarkan iyo sidoo kale dhamaan Amarada kale ee ODH moojee.

2. **Waji Daboolka (Waji Gashadka) Waa Waajib :** Dhamaan dadka waxaa ku waajib ah inay xidhaan waji gashad (waji dabool) si ay ugu hogaansamaan Amarkan mar kasta oo ay ku jiraan ama ay soo galaan dayrka Tukaan ("Dayrka Tukaanka"). Waji daboolka (waji gashadka) waajibka ah ee ku jira Amarka Agaasimaha ee Wajiga Lagu Xidhanayo ee Gobolka Ohio oo dhan, waxaa la saxeexay Julaay 23, 2020, wax ayaa laga badali karaa , wuu sii jiri doonaa marka laga reebo marka uu qofku uu ku jiro tukaanka ama Dayrka Tukaanka looga baahan yahay inuu u hogaansamo ilaalinta la kordhiyay ee Amarkan ku taala. Shaqaalaha waxaa lagu soo qaaday amarada qaybaha hore taas oo khusaysa tukaamada tafaariiqda. Tani ma khusayso caruurta ka yar 10 sano jirka.

3. **Soo Dhejinta Macluumaadka Wargelinta :** Dhamaan Tafaariiqda waa inay calaamado si fiican u muuqda ku dhajiyaan dhamaan meelaha laga soo galayo Dayrka Tukaankooda kuwaas oo dhigaya in qof kasta ay waajib ku tahay inay xidhaan waji gashad sida uu dhigayo Amarkani. Qoraalka waa in lagu sheegaa in dhamaan dadka looga baahan yahay inay xidhaan waji gashad mar kasta inta ay ku jiraan Dayrta Tukaanka. Calaamadaha noocan ah waxaa lagala degi karaa https://coronavirus.ohio.gov /wps/po rtal/gov/covid-19/responsible- restart-ohio /Posters- and-Signs/ ganacsiyada u baahan in laga caawiyo daabacaada calaamadahan waxay la xidhiidhi karaan Xarunta Wicitaanka ee Waaxda Ohio ee Caafimaadka 1-833-4 - WAYDII-ODH (1-833-427-5634).

4. **Masuuliyada:** Tukaamadu waa inay xaqiijiyaan u hogaansanka Amarkan goob kasta. Dadka galaya Dayrka Tukaanka waa inay u hogaansamayaan qodobada Amarkan iyo Wargelinta lasoo dhajiyo iyadoo waafaqsan baaragaraafka 3. Shaqaalaha tukaanka loogama baahna inay naftooda geliyaan khatar marka ay dhaqan gelinayaan Amarkan.

5. **Waji DaboolkaWaxaa Lagu Qeexaa:** Waji daboolka (waji gashadka) waa inuu ka samaysnaadaa maro ama wax u dhigma oo waa inuu sanka, afka iyo dhabadana qofka daboolaa. Waji daboolku waa inuu noqdaa mid qofka aan dhibin , si markaa cida xidhan ay si wanaagsan uga neefsan karto sanka oo ayna ugu baahan inay kolba habaysato, si markaa taabashada badan ee wajiga loo baajiyo.

6. **Kala Fogaanshaha iyo Nadaafada:** Dhamaan tukaamadu waa inay kusoo dhajiyaan meelaha laga soo galayo oo ay dhaqan geliyaan inta ugu badan ee dad ee ku jiri karta sida lagu sheegey Maajo 29, 2020 Amarka Cusub ee Agaasimaha ee Tilmaamaha Ganacsiyada iyo Kala Fogaanshaha; waa in la xadidaa oo la habeeyaa tirada dadka soo galaya tukaamada si markaa loo xaqiijiyo in lix fuudh ay u dhaxeeyaan dadka ku jira , calaamado yaryar oo 6' ah oo kala qaybinaya dadka meesha ay istaagayaan sameeyaan; oo waa inay marinada tukaanka u qaabeeyaan qaab hal dhinac dadku u soconayaan hadii loogu baahan yahay in lagu helo kala fogaanshaha dadka ee habboon. Tukaamada sidoo kale waa inay dhigaan gacmo nafiiye meelaha dadka ku badan yihiin; waa inay ku waajibiyaan shaqaalaha farxal joogto ah; ku amraan shaqaalaha inay joogaan gurigooda hadii ay qabaan calaamado; oo ay jeermiska ka dilaan shayada badanaa la taataabto isticmaal kasta kadib (sida, gaari-gacanka adeegga, saladaha, iyo agabka kale).

7. **QaabilaadMacquul ah:** Tukaan kastaa waa inuu bixiyaa qaabilaad macquul ah oo dadka aan xidhan karin waji gashadka ah inta ay ku jiraan gudaha tukaanka isaga oo markaa siinaya dalabka onlaynka ama taleefanka oo loogu geeyo banaanka, qaadashada iyada oo aan la isasoo gaadhin ama ikhtiyaarka u gaynta; iyo/ama (b) taas oo u sahlaysa in qofku uu xidho muraayad wajigiisa oo dhan uu ku dahaadhayo ilaa gadhka. Amarkan ma khuseeyo dadka qaba xanuunada ama korniinkoodu aanu u ogolaanaynin inay xidhaan waji gashad. Wargelin,marka laga tago shuruudaha baaragaraafka 3 , waa in lasoo dhigaa meesha laga soo galo Dayrka Tukaanka oo markaana ay siiyaan faahfaahinta qaabilaada noocaas ah. Calaamadahaas waxa laga soo dejisan karaa https://coronavirus.ohio.gov/wps/portal/gov/covid-19/responsi ble-restart-ohio/Posters-and- Signs/. Tukaamadu waa inay soo dhigaan wixii qaabilaad ah websaytkooda, hadii ay leeyihiin. Dadka tukaamaysanaya waxa si wayn loogu boorinayaa inay adeegsadaan dalabka onlaynka ama taleefanka oo wadada agteeda loogu geeyo , ugu qaataan iyada oo aan la isasoo gaadhin ama loogu geeyo guriga.

8. **SarkaalkaU Hogaansanka Lagu Qoray.** Ganacsi kasta waa inuu sameeyaa sarkaal u hogaansan oo goobta jooga goob kasta oo ganacsi iyo gellin kasta oo shaqo ah inta lagu jiro saacadaha shaqada kuwaas oo masuuliyadoodu tahay inay xaqiijiyaan u hogaansanka Amarkan. Qofka loo asteeyay waxaa weeye sidoo kale cida ay la xidhiidhayso waaxda caafimaadka deegaanku iyo hay'adaha amaanka deegaanka ka taliyaa.

9. **Jawaabta Caafimaadka Marka Lagu Xadgudubto.** Marka ay soo baxdo wargelinta ku xadgudubka Amarkan ee uu soo saaro wakiilka ODH, waaxda caafimaadka deegaanka ama degmada , ama bilayska, dayrka ganacsiga waa in markaba la xidho oo ayna dadku soo gelin mudo aan ka badnayn afar iyo labaatan saacadood, sida lagu sheegey wargelinta ku xad gudubka, si markaa loo nadiifiyo dhibcaha COVID-19 wata ee hawada ku jira. Wakiilka ayaa digniin hore bixin doona oo gudaha ganacsiga ah kahor inta aanu soo saarin wargelinta ku xad gudubka ee u baahan xidhitaanka.

10. **Wada Shaqaynta.** Dhamaan ganacsiyada waa inay ogolaadaan galitaanka, baaritaanka meelaha dadku iskugu yimaadaan ee meeshooda, ee uu baadhayo wakiilka ODH, waaxaha caafimaadka deegaanka ama degmooyinka iyo bilayska inta la shaqaynayo; ay bixiyaan wax macluumaad ah oo u hogaansanka Amarkan ah oo la dalbado ; iyo, waa inay si buuxda ula shaqeeyaan baadhista ama baadhitaanka u hogaansanka.

11. **KormeerkaU Hogaansan La'aanta.** Dadka muwaadiniinta arka ku xad gudub Amarkan ah waa inay wargeliyaan Iyada oo Kala Hadlaya Xarunta Waaxda Caafimaadka Ohio 1-833-4-ASK-ODH (1-833-427-5634). Waaxaha caafimaadka deegaanka ayaa sidoo kale ka dalban kara kaalmo ODH hadii loo baahan yahay in lala hadlo Xarunta Wicitaanka ODH.

12. **OgolaanshahaShaqaalaha Gobolka ee Leh Awooda Dhaqan Gelinta: U xilsaaridda BWC ee Baadhaayaasha Caafimaadka iyo Amaanka.** Sida ay dhigayso R.C. 3701.28, shaqaalaha Gobolka Ohio ee leh awooda dhaqan gelinta , gaar ahaan shaqaalaha Xafiiska Ohio ee Magdhawga ' Shaqaalaha Qaybtiis Hogaansanka Tukaanada, waaxda caafimaadka deegaanka ama degmada, iyo ciidamaha bilayska deegaanka waxa halkan lagu siiyay awood baadhitaan iyo dhaqan gelin Amarkan ah iyagoo ah wakiilada ODH.

13. **Ganacsiyada Aanu Khusayn Amarkan:** Amarkan ma khuseeyo ganacsiga Amar ODH oo kasta oo soo socda sida halkan kadib wax laga baddalay:

**a.** Agaasimaha' Amarkiisa Waxka Badalka Sadexaad lagu sameeyey ee Dib u Furitaanka Maqaaxiyaha, Baararka, Adeegyada iyo Xarumaha Cuntada iyo Cabitaanka ee Wax Lagu Dhax cuno ama Cabbo, marka Laga Tago wixii laga soo Reebey ee la saxeexay Sebteembar 23, 2020;

**b.** Wax ka Badalka Amarka Agaasimaha ee Dib u Furitaanka Koofeerada, Day Spas, Meelaha Is Qurxinta, Rayslayaasha, Meelaha Jidhka Lagu Tunto, Meelaha Jidhka Lagu Dalooliyo iyo Xarumaha Madoobaynta Maqaarka oo la saxeexay Oktoobar 9, 2020; iyo,

**c.** Agaasimaha Amarkiisa Dib u Furitaanka Jiimka, Meelaha Jaaska Lagu Barto, iyo Meelaha Kale ee JImicsiga Shakhsiyeed waxa la saxeexay Maajo 22, 2020.

14. **Amarada Kale ee ODH:** Siday dhigayaan Amarada ay soo saareen ODH marka laga tago kuwa ku qoran baaragaraafka hore, Amarkan waxa uu joojinayaan wixii Amaro hore oo lasoo saaray oo aan waafaqsanayn Amarkan qodobadiisa.

15. **Dheeraad.** Wax ku jira Amarkan looguma talo gelin inay faro geliyaan kala qaadista awoodaha ee uu dhigayo Dastuurka Ohio. Amarkan ma khuseeyojeelasha ama xabsiyada. Amarkan looguma talo gelin inuu badalo, dheeraad u noqdo ama uu meesha ka saaro wixii amar ah ama sharci ah ee deegaanka ah ee ka xadidaad badan Amarkan.

Sidaa darteed, Waxa aan halkan ku**AMRAYAA** in dhamaan dadku xidhaan waji gashad inta ay joogaan ama ku jiraan Dayrka Tukaamada Gobolka Ohio sida ku cad Amarkan. Amarkan waxa uu dhaqan geley 12:01 habeenimo Noofamber 16, 2020 oo si buuxda ayaa loo dhaqan gelin doonaa oo waxa uu sii jiri doonaa ilaa wakhtiga uu ku eeg tahay Amarka Fulinta ee Badhasaabka ee Bandooda ama uu joojiyo ama uu wax badalo Amarkan Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Ohio. Ilaa heerka wax kamid ah saraakiisha caafimaadka dadwaynaha ee dhaqan gelinaysa Amarkan ay ka qabto wax su'aal ah dhaqangalka tan

Amarkan, Agaasimaha Caafimaadka ayaa u wakiilanaya waaxaha caafimaadka deegaanka masuuliyada ka jawaabida su'aalaha oo qoraal ah iyo si waafaqsan Amarkan.

Noofembar 13, 2020

Lance D. Himes
Agaasimaha Kumeel Gaadhka ah ee Caafimaadka